



United Nations Educational, Scientific
and Cultural Organization



AF SOOMAALI

			
gacan	gambaal	goroyo	geed

	
---	---

Goobo gelli dhammaan erayada ka
bilaabma.  ama 



HORDHAC

Buuggan oo ah Af-Soomaali fasalka kowaad, waxa soo diyaariyey Xarunta Horumarinta Manaahijta ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta, wuxu ka mid yahay buugagga manhajka cusub ee Sannadka 1985ka bilaabmay.

Buuggani waxa uu ardayda ka caawinayaa kobciska awooddooda ee xirfadaha kala duwan ee salka u ah afka sida dhegeysiga, hadalka, akhriska iyo qoraalka.

Buuggan waxa aan ku rajo weynahay in uu isbeddel la taaban karo ku sameeyo barashada af-Soomaaliga.

Xasan Daahir Obsiye
Agaasimaha Waaxda H. Manaahijta

XUSUUSNOW

Af Soomaaligu waa af qoriddisu ay cusub tahay. Midayntiisu waxa ay qaadanaysaa wakhti dheer. Erayadan soo sooda waxa ay ka mid yihiin erayada loogu dhawaaqi karo loona higgadiyo laba silyaabood oo kala gaddisan :


waadh	weer	xadhig	xarig
hadhl	harl	xidhay	xiray
adhl	arl	badh	bar
gabadh	gabar	yeedhay	yeeray
hadhuudh	haruur	kildhl	kirll
foodhln	foorln	yidhl/tidhl	yiri/tliri
		feadh	feer

HORDHAC


Buuggaan waxaa soo ururiyay, iskuna soo dubariday daabacadiisa labaad Koxda Farsamada ee Xafiiska UNESCO u qaabilsan tala bixinta waxbarashada

Maajo 1994







Raadi cuntada xayawaannada.



1. Mid baa ka gooniya. Ku sawir X.




2. Xarijimo ku sawir kuwa isku midka ah dhexdooda.





Sawir jidka.



1. Xaggee baa ay tegayaan? Sawir jidka.



2. U dhammaystir sawirka bidix ilaa midig



Sawir musawirkaaga. Ku qormagacaaga.

Dh l Q e H b ee T

a i uu

kh R li

C d N f

y n Aa Oo

Ee B D j

Kh s A o g

G J r E

dh, x U O

aa h U O


M m Uu

q Y


w t L F k oo W u X i K Y

sh ii c Sh

Maxaa ka duwan? Ku sawir X.



2. Wax baa ka maqan. Dhammaystir sawirka.



1. Ku sawir xarriiqda dusheeda.









2. Sawir madaxyada wejiyadan.





3. Sawir koobabka.





4. Ku sawir samay-ubaxeedka ubaxyadan.






La raac qalinkaaga dhibcaha.






muus




miis




mas




mind



Goobo ku sawir dhammaan xarafka **m** ama **M**



Handwriting practice lines. The first line contains a cursive lowercase 'm'. The second line contains a cursive uppercase 'M'. The rest of the lines are blank.





af

aqal

arday


askari



Goobo geli dhammaan erayada leh


a ama A

suun, mas, af, miis, Aqal, bisad,
Awr, geel, ubax, calan



a _____

A _____





saacad

suun

sanduuq

sabuul



Goobo geli dhammaan erayada leh

s ama S

bisad, suun mas seef, masar,
Sahra, furo, san, kurus, Surwaal



S _____


Ma doonaysaa babaay
Haddii aad rabtid babaay
Si aad u hesho babaay
Adigu beero babaay.



Ma doonaysaa galley
Haddii aad rabtid galley
Si aad u hesho galley
Adigu beero galley.



Ma doonaysaa hadhuudh
Haddii aad rabtid hadhuudh
Si aad u hesho hadhuudh
Adigu beero hadhuudh.




buug





baal




bas




bisad



Goobo ku sawir dhammaan xarafka **b** ama **B**






il

ilig

irbad

irrid

li







Goobo geli dhammaan erayada leh


i ama l

mind, geed, Ibraahim, lug, nin, kab,
kursi, beer, Ismaaciil, shimbir


1. Sawir musawir ku bilaabma xarafka.



2. Maxaa aad arki kartaa? Dheh erayada.
Xaggee baad ka maqashaa **i s a m b**?
Sawir xarijimo.

3. Ku buuxi a. Akhri erayada.

b_s m_s





lacag

lug

libaax

lo'



Goobo geli dhammaan erayada ku bilaabma


L ama L

Axmød laan Ladane læexo ilmo liin

Luul Layla baal saabuun webi

L

L




baal

shaati

taallo

qaaddo



Goobo geli dhammaan erayada leh


aa ama Aa

wiil naag dugsi waa tuke

Aamina fiiri nacaac Xaawa cambe

aa

Aa



nal



nacnac




naag




nin

Nn



Goobo ku sawir dhammaan xarafka n ama N


N i t n a
o K n B r N
m s M e l



n _____


N _____





ri raadiyow rooti rah

Rr




Goobo geli dhammaan erayada leh

r ama R

dugsi nin carruur masar dhar
Rooble maqal orod tag Ruun


r

R



ukun ubax ul

Uu




Goobo ku sawir dhammaan xarafka u ama U

u b u T A
o s r e u u U
w f q m


u

U

1. Dhawaaqee baad erayga ugu hor maqashaa?
Qor xarafkaas.




2. Maxaa aad arki kartaa? Dheh ereyada.
Xaggee baad ka maqashaa? l aa n r u
Sawir xarijimo.




3. Ku buuxi l Akhri erayada.

n__n r__




dooni danbiil dayuurad dameer

Dd



Goobo geli dhammaan erayada leh d ama D
bisad dukaan beer Dahabo rooti
Cali Daahir rah derbi dugsi

d _____
D _____






koob

kab

kursi


kalluun



Goobo geli dhammaan erayada leh **k** ama **K**
 baaskiil ilmo Kismaayo Sahra dukaan adhi
 kurdad far kaalay **Kani** 

k

K





wiil

waran


wiyil

wan




Goobo ku sawir dhammaan xarafka **w** ama **W**

A W g t k u
 M w r e n u b s



w

W




gacan



gambaleel



goroyo



geed


Gg



Goobo geli dhammaan erayada ku
 bilaabma **g** ama **G**
 naag galley dugsi geel gabay
 Geelle haan gabadh shanlo **guri**

g


G



oday





orgi

olol




Goobo geli dhammaan erayada leh ama
 qalin Hodon sheeko Cali biyo
 Orod xafiis laba riyo toban

1. Sawir musawir ku bilaabma xarafka.



2. Maxaa aad arki kartaa? Dheh erayada.

Xaggee baad ka maqashaa? o g w k d.
 Sawir xariijimo.



o g w k d


3. Ku buuxi o. Akhri erayada.

__rgi



ilm__

__l__

__ll__



haan hal hangool harag




Goobo ku sawir dhammaan xarafka h ama H



H h w
 b s h o t d h
 h n r M

h _____

H _____



xaashi xaaqin xabxab xarig




Goobo geli dhammaan erayada leh x ama X

Maxamed faras dhagax dheri

Axmed Xaawa jeer læexo daar Xaliimo

x _____

X _____





koob

koor

roob



rooti




Goobo geli dhammaan erayada leh oo ama Oo
 Oomaar Dhool sac Dhoorre Dahabo
 Toolmoon buug Axmed gabar
 Habboon.

oo

Oo






tarmuus

taallo

tusbax

taraq


Tt




Goobo geli dhammaan erayada ku
 bilaabma **t** ama **T**

Toolmoon gabadh tuug surwaal **timir**
 tuur seef waraabe tuko teneg

t _____
 T _____



Ee




Goobo ku sawir dhammaan xarafka **E** ama **e**

b s u E F e E D
 e a E g r aa r B


e _____
 E _____

Dhawaaqee baad erayga ugu hor maqashaa?
Qor xarafkaas.



Maxaa aad arki kartaa? Dheh erayada.
Xaggee baad ka maqashaa?

Sawir xariijimo. h x oo t e



Ku buuxi h Akhri erayada.
aan ra_ _al_




faras

fure

feynuus

faas

Ff



Goobo geli dhammaan erayada ku
bilaabma f ama F


Faarax saacad fasax kildhi fasal

Faysal hilib Fardowsa miis feedh



f _____

F _____





buug

suun


muus

suul



Goobo geli dhammaan erayada leh uu ama Uu
 Nuux dibi Nuur muus Nuuro
 nuurad Uunsi baabuur uumi fuul

u _____
 u _____





calan

cadceed






caleen

caaro



Goobo geli dhammaan erayada ku
 bilaabma c ama C
 Cadar Luul cab aqal Cartan
 soco cir sabuurad Cibaado firinbi

c _____
 C _____



qful





qaaddo



qaanso




qalin




Goobo ku sawir dhammaan xarafka **q** ama **Q**

Q M q S O t d o
 J R e Q o u
 w a e F L s



q _____

Q _____




miis

liin

jiir

dhiil






Goobo geli dhammaan erayada leh ii ama li
 ciid dhagax fariid xafiis fiiri
 daruur Ismaaciil kursi Isniin caleen

ii

li

1. Sawir musawir ku bilaabma xarafka.



2. Maxaa aad arki kartaa? Dheh ereyada.

Xaggee baad ka maqashaa? f uu c q ii

Sawir xariijimo.




f uu c q ii

3. Ku buuxi ii Akhri erayada.

w _ _ l

m _ _ s

d _ _ n




jiir

jaraanaro

jawaan

jid


Jj



Goobo geli dhammaan erayada ku
 bilaabma **J** ama **J**
 Jibriil muus joogso caano Jimce
 jawaab kab Jaamac jiifso uunsi

J _____

J _____




yaambo

yaxaas

yaanyo

Yy



Goobo geli dhammaan erayada leh **y** ama **Y**
 Faysal guri fulay rooti Yurub
 suun Yaasiin qalin yar weyn

y _____


Y _____



leeb



seef




ceel



geed

Ee
ee





Goobo ku sawir dhammaan xarafka ee ama Ee

ee e Ff S
m aa sh u uu f
Uu k oo Ee Ee


ee

Ee






dhalo



dheri




dhar



dhiil

Dh
dh




Goobo geli dhammaan erayada leh **dh** ama **Dh**
 Khamiis Dhool dhuxul joodari
 dhoobo jilib dhismo jiinbaar dhaan dheg

dh

Dh



shaati



shinni




shimbir



shabeel


Sh
sh



Goobo geli dhammaan erayada ku
 bilaabma **Sh** ama **sh**
 Shukri bariis shalay Sahra **Shariif**
 shaah sheeko waraaq shir boorso

sh

Sh



khad khamiis khudaar khaanad

Kh
kh





Goobo geli dhammaan erayada leh **kh** ama **Kh**
gabar Khadiija akhri Koos masar
khayr albaab Khaliif saacad taariikh


kh _____

Kh _____

Sawir musawir ku bilaabma xarafka.



2. Maxaa aad arki kartaa? Dheh ereyada.
Xaggee baad ka maqashaa? **j ee y dh sh kh**?
Sawir xariijimo.



j **aa** **y** **dh** **sh** **kh**

3. Ku buuxi **ee** Akhri erayada.

j _ _ r _ _ _ y shab _ _ l

1. Buuxi xarfaha.

1.r

2	f	3	4
---	---	---	---

2.f

2	3	4	6
---	---	---	---

3.a

2	3	4	5
---	---	---	---

4.s


2	3	4	5
---	---	---	---

5.u

2	3	4	5
---	---	---	---

6.e

2	3	4	5
---	---	---	---



2. Ku sawir xariiq u dhexaysa erayada iyo sawirka. Sawirro ayaa ka soo hadhi doona.

geel
shaati
qalin
nal
wan


3. Akhri oo sawir.

will	koob	jid	geed

1. Xarafkee yar baa ku aadaya xarfka weyn?

○ — (d)	
○ — (f)	○ — (b)
○ — (h)	○ — (a)
○ — (e)	○ — (i)
	○ — (k)

2. Ma helaysda magacyada?



- 3, 1, 10, 2, 7 = C _____
- 4, 1, 8, 5, 1 = _____
- 1, 1, 9, 7, 6, 1 = _____



gabar


wiil

ilmo

bisad



1. Ku sawir xariiq u dhexaysa erayga iyo sawirka.



ilmo

wiil

bisad

gabar

2. Eraygøe baa ku habboon sawirka?



wiish *wiil* *kiish* *wiiq*



bisin *bil* *bisad* *bisil*



gaban *gabay* *gadh* *gabar*



ilig *ilmo* *ilbax* *ilays*

3. Qor erayada sawirada.



gabar







dugsi

arday

calan


beer



1. Ku sawir xariiq u dhexaysa erayga iyo sawirka.



dugsi
arday
calan
beer



2. Eraygee baa ku habboon sawirka?
Xariiq hoos mari.



ardaa arbe aragti arday



calan cagaf cag cafi





dugaag dugsi dugsoon dugsasho



beel been beer beegid

3. Qor erayada sawirada.






webi

nin

mundul

galley



1. Ku sawir xariiq u dhaxaysa erayga iyo sawirka.



nin
webi
mundul
galley



2. Eraygaa baa ku habboon sawirka?

Xariiq hoos mari.



weji wan webi waran



musbaar mundul muraayad muruq



galab galayr gabay galley




nin nimco niyad norig

3. Qor erayada sawirada.




1. Ku qor erayada sawirrada hoostooda.
Erayo ayaa ka soo hari doona.

arday	dugsi	mundul
beer	gabar	nin
bisad	galley	webi
calan	ilmo	wiil







- b. Xoolahee baa ina siiya caano?
 t. Xoolahee baa ina siiya hilib?
 j. Xoolahee baa ina siiya saamo?
 x. Xayawaankée baa inoo ilaaliya guryaheena?
 kh. Xayawaankée baa mararka qaarkood khatar ah?
 d. Xayawaankée baad jeceshahay?







baabuur


xafiis

dukaan

dameer



1. Ku sawir xariiq u dhaxaysa erayga iyo sawirka.

baabuur
dameerxafiis
dukaan

2. Eraygee baa ku habboon sawirka?
Xariiq hoos mari.



daayer dameer dabqaad dayuurad



babaay baal basbaas baabuur





durbaan dugsi dukaan dubbe



xafiis xarig xaaqin xaashi

3. Qor erayada sawirada.







aqal

geel

waran

haan



1. Ku sawir xariiq u dhexaysa erayga iyo sawirka.



waran
geel
aqal
haan



2. Eraygee baa ku habboon sawirka?
Xariiq hoos mari.



aqab aqool asal aqai



garan taran raran waran



haad haan haar haash



geel geed geer gees

3. Qor erayada sawirada.






ayeyyo

sheeko

guri

carruur



1. Ku sawir xariiq u dhaxaysa erayga iyo sawirka.




ayeyyo

sheeko

guri

carruur



2. Eraygee baa ku habboon sawirka?
Xariiq hoos mari.



sheekh shariif sheeg sheeko



baruur carruur cashuur daruur



gura guddi guri guur







awoowo abeeso aayo ayeyyo

3. Qor erayada sawirada.



1. Ku qor ɛrayada sawirrada hoostooda.
 Erayo ayaa ka soo hari doona.

baabuur	shæko	waran
xafiis	carruur	haan
dameer	geel	aqal
dukaan	guri	ayeeyo



2. Ku buuxi [ee] Akhri ɛrayada.


dam__r, sh__ko g__l, ay__yo

wiil	ilmo	webi
beer	dugsi	guri
haan	aqal	niri



--	--	--

--	--	--

--	--	--



libaax	maroodi
jeer	daayeer



1. Ku sawir xariiq u dhaxaysa erayga iyo sawirka.



maroodi
jeer



libaax
daayeer



2. Eraygee baa ku habboon sawirka?
Xariiq hoos mari.



liibaan liin libaax lixdan



daayeer dayax dameer deero




madax maroodi madow magaalo



jeeb jeedal jeego jeer

3. Qor erayada sawirada.







awr

maqal

ari

naag



1. Ku sawir xariiq u dhexaysa erayga iyo sawirka.



maqal

naag

awr

ari



2. Eraygee baa ku habboon sawirka?
Xarriiq hoos mari.



aqal awr askari arday



ari axad ayax ardo



naas naar naag naado



maqas maro masaajid maqal

3. Qor erayada sawirada.









shaati

kurdad

surwaal

masar



1. Ku sawir xariiq u dhaxaysa erayga iyo sawirka.



surwaal



masar

kurdad



shaati



2. Eraygee baa ku habboon sawirka?

Xarriiq hoos mari.



kubbad kursi kutub kurdad



surwaal suxul suurad surin





malab maskax masar mas





shaah shaati shabag shabeel

3. Qor erayada sawirada.




1. Ku qor erayada sawirada hoostooda.
Erayo ayaa ka soo hari doona.

ari	kurdad	masar
awr	libaax	naag
daayeer	maroodi	shaati
jeer	maqal	surwaal



2. Ku buuxi **aa** Akhri erayada.

n___g surw___l sh___ti d___yeer







kalluun

shabag

huuri

kubbad



1. Ku sawir xariiq u dhaxaysa erayga iyo sawirka.



huuri
kalluun



shabag
kubbad



2. Eraygee baa ku habboon sawirka?
Xariiq hoos mari.



kurdad kutub kubbad kuras



huuri hurdo hunguri hurid





kalax kalkaal kaalmo kalluun



shanlo shabag shimbir shabeel

3 Qor erayada sawirada.






masaajid


Quraan

tusbax

sadaqo



1. Ku sawir xariiq u dhaxaysa *erayga iyo sawirka.*



sadaqo

Quraan

masaajid



tusbax



2. *Eraygee baa ku habboon sawirka?*
Xariiq hoos mari.



maadays maahmaah masabid masaajid



saaxiib sadaqo sariir sagaaro




quful qorrax Quraan qurub



tusbax tusaale turuq tuke

3. *Qor erayada sawirada.*





leexo


jalaato

biibiile

baaskiil

nacnac

foorin



1. Ku sawir xariiq u dhexaysa erayga iyo sawirka.




biibiile
foorin



jalaato
baaskiil



leexo



nacnac



2. Eraygee baa ku habboon sawirka?

Xariiq hoos mari.



leeb leef leexo lexi



nabad nasasho nadaafad nacnac





foorin fooldhaq foolxumo foolin





baabuur baaskiil bisbaas bakhayl

3. Qor erayadii sawirada.



1. Ku sawir xariiq u dhaxaysa erayga iyo sawirka.

baaskiil sadaqo kalluun nacnac
 biibiile shabag kubbad huuri
 tusbax foorin leexo
 jalaato Quraan masaajid

2. Ku buuxi **b** Akhri erayada.

sha__ag tus__ax __ii__iile __aaskiil



16?



wiil

- | | |
|--------------|-------------|
| 1. kalluun | 26. calan |
| 2. naag | 27. aqal |
| 3. arday | 28. sheeko |
| 4. baabuur | 29. kurdad |
| 5. guri | 30. Quraan |
| 6. biibiile | 31. ilmo |
| 7. gabar | 32. galley |
| 8. geel | 33. ayeeyo |
| 9. awr | 34. masar |
| 10. shaati | 35. sadaqo |
| 11. tusbax | 36. dugsi |
| 12. mundul | 37. dameer |
| 13. nin | 38. maroodi |
| 14. libaax | 39. huuri |
| 15. jalaato | 40. leexo |
| 16. wiil | 41. beer |
| 17. dukaan | 42. haan |
| 18. carruur | 43. jeer |
| 19. surwaal | 44. shabag |
| 20. masaajid | 45. nacnac |
| 21. bisad | 46. webi |
| 22. xafiis | 47. waran |
| 23. ari | 48. daayeer |
| 24. maqal | 49. kubbad |
| 25. baaskiil | 50. foorin. |



Sahra Axmed



Tani waa Sahra.



Sahra Aamina Safiya.

1. Buuxi erayada maqan. Akhri weeraha.



Tani waa S _____



Tani waa A _____



Tani waa S _____

Tani _____ Sahra.



_____ waa Safiya.



2. Buuxi xarfaha waaweyn. Akhri magacyada.


__ahra __amina __xmed __afiya.



Tani ma Sahraa?
 Maya.
 Tani ma Aaminaa?
 Maya.
 Tani ma Safiyaa?
 Haa.



Kani waa Axmed.



Cumar Axmed Cali

1. Buuxi erayada maqan. Akhri weeraha.




Kani waa C_____



Kani waa A_____

Kani_____Cali.



_____waa Cumar.



2. Kaga jawaab su'aalahan Haa ama Maya.



Tani ma Sahraa?



Tani ma Aaminaa?



Kani ma Axmed baa?

Maya.

Kani ma Cumar baa?

Maya.

Kani ma Cali baa?

Haa.



Tani ma Aaminaa?

Maya.

Kani ma Axmed baa?

Maya.

Tani ma Sahraa?

Haa.

1. Buuxi erayada maqan. Akhri weeraha



Kani ma Cumar baa?

Maya.

Kani waa _____



Tani ma Sahraa?

Maya.

Tani waa _____

_____waa Aamina.



_____waa Cali.



Kani ma Cali _____?




Sahra waxa ay tegaysaa dugsiga.



Subax wanaagsan, Sahra.

Subax wanaagsan, Faadumo.



Subax wanaagsan, arday



Subax wanaagsan, bare.



Kani waa dugsiga Sahra.

Ma weyna.




1. Qor waxa ay dhahayaan.



2. U qor erayada sida ay iskugu xigaan.
Sawirada ayaa ku caawinaya.

a. wanaagsan, Sahra. Subax

b. dugsiga waa Kani Sahra.



Sahra fasalka ayey galeysaa.
Aaway saaxiibaday?



Kani waa macallinkii Sahra.
Maxaa aan qoray?









Sahra waa ay akhriyeesaa.
Waa aan jeclahay akhriska.

Sahra waa ay akhriyaysaa.

Kani waa macallinkii Sahra.


Sahra fasalka ayey galeysaa.

Maxaa aan qoray?







*Ardaydu waa ay dheelayaan.
Dhakhso.
Sahra aad bay u ordaysaa.*



*Ardaydu waxa ay u wada
shaqaynayaan laba-laba.
Ma fahamtay?
Haa.*

Tirada sawirka ku ag qor weerta ku habboon.

- Sahra aad bay u ordaysaa.*
- Ma fahamtay?*
- Ardaydu waa ay dheelayaan.*
- Ardaydu waxa ay u wada
shaqaynayaan laba-laba.*






*Bood, bood, bood.
Xarigga ha taaban.*





*Fiiri, fiiri, fiiri.
Shimbirtan.
Waa ay nooshahay.*



*Walaal, fiiri shimbirtayda.
Xaggæ baan dhigaa?*


1. Qor waxa ay dhahayaan.



2. U qor erayada sida ay iskugu xigaan.
nooshahay. ay Waa

taaban. Xarigga ha

baan dhigaa? Xaggæ



Ardaydu waa ay heesayaan.
Maxaa ay ku heesayaan?
Heesta Calanka.




Axmed waxa uu salaamayaa
macallinka.
Nabad, macallin.



Axmed wuu kaalmaynayaa.
Waxa uu soo qaadayaa tabaashiir.

Weedhaha saxa ah ku hoos qor sawirada.

Axmed waxa uu salaamayaa macallinka.
Axmed wuu kaalmaynayaa.
Ardaydu waa ay heesayaan.
Walaal, fiiri shimbirtayda.



1. Ma heli kartaa erayada qarsoon?
sawirrada ayaa ku caawinaya.




1.	n	s	h	i	m	b	i	r	t
2.	i	k	b	a	a	b	u	u	r
3.	a	w	t	r	o	o	t	i	l
4.	y	s	x	a	r	i	g	g	a
5.	e	h	d	u	g	s	i	o	s
6.	o	i	t	a	i	w	i	i	l
7.	w	h	d	o	o	n	x	c	a



2. Ku qor erayada halkan.

1. _____
2. _____
3. _____
4. _____
5. _____
6. _____
7. _____



Axmed wuu qorayaa.
Waxa uu qorayaa eray.
Waa aan jeclahay qorista.



Axmed wuu sawirayaa.
Waxa aan sawirayaa guri.

Dhammaystir weeraha.

Axmed waxa uu sawirayaa

(muus, guri, bisad)



Axmed waxa uu qorayaa

(buug, magaca, eray).



Axmed waxa uu salaamayaa

(Cumar, macallinka, arday).



Axmed waxa uu soo qaadayaa


(qalin, kubbad, tabaashiir).



Ardaydu wax bay jilayaan.
Wiilka jiifaa wuu bukaa.





Waa aan gaajoonayaa.
Rooti baan rabaa.



Axmed wuu tartamayaa.
Orod, orod, orod.

1. Qor waxa ay dhahayaan.




2. U qor erayada sida ay iskugu xigaan.

tartamayaa. wuu Axmed

bay Ardaydu jilayaan. wax

jiifaa wuu Wiilka bukaa.



Fiiroya caleemaha.
Ma isku egyihiin?



Axmed guriga ayuu u socdaa.
Waxa uu la socdaa saaxiibkii.



Axmed waxa uu goosanayaa liin.
Waa aan jecelahay liinta.

Ugu qor weeraha si sax ah sawirada agtooda.

Axmed guriga ayuu u socdaa.

Fiiriya caleemaha.


Axmed wuu tartamayaa.

Waa aan jecelahaya liinta.











Hal eray oo ka mid ah afarta eray ayaa macno leh.

Xarriiq hoos mari erayga oo sawir musawirkiisa.


ruri
guri
turi
muri




giin
fiin
wiin
liin



huus
luus
muus
duus



geel
teel
reel
seel





Axmed waxa uu samaynayaa
doon.

Kaalaya aan ku dheelnee.



Axmed waxa uu haystaa baabuur.
Isaga ayaa samaceyey.

Dhacmaystir waa afa.



Axmed waxa uu goosnayaa

(muus, babary, liin).



Axmed waxa uu samaynayaa

(waran, baabuur, doon).




Axmed waxa uu haystaa

(baabuur, doon, kubbad).



Waxa uu la soodaa

(macallinkii, saxiibkii, Sahra).



*Ardaydu waa ay tegayaan.
Xaggee ayey tegayaan?
Dugsi kale.*



*Sahra waa ay ciyaaraysaa.
Ardaydu waa ay sacabinayaan.*



*Sahra waxa ay daawanaysaa
dheel.
Maxaa la dheelayaa?
Kubbadda cagta.*

*Dhammaystir weeraha. Waxa ka soo hadhaya
erayo.*

<i>ciyaaraysaa</i>	<i>tartamayaa</i>
<i>tegayaan</i>	<i>sacabinayaan</i>
<i>samaynayaa</i>	<i>daawanaysaa</i>

Sahra waa ay _____



Ardaydu waa ay _____



Sahra waxa ay _____




dheel.

Ardaydu waa ay _____





*Sahra waa ay sheekeynaysaa.
Ardaydu waa ay dhegeysanaysaa.*




*Waa aad salaaman tihiin
dhammaantiin.
Ku soo dhawaada dugsiga.*



*Axmed oo abaalgud qaadanaya.
Wuu faraxsan yahay.*

*Waaraha saxa ah ku hoos qor sawirada
Ku soo dhawaada dugsiga.
Axmed oo abaalgud qaadanaya.
Sahra waa ay sheekeynaysaa.
Sahra waa ay ciyaaraysaa.*





Hambalyo.

Mahadsanid.

Maxaa lagu siiyey?

Buug iyo qalin.



Carruurtaaydu aad bay u

fiican tahay.

Sahra na abaalgud bay heshay.

Maxaad soo baratay?

Bb Tt Jj Xx Kh

kh Dd Rr Ss Sh

sh Dh dh Cc Gg

Ff Qq Kk Ll Mm

Nn Ww Hh Yy

Aa aa Ee ee li ii

Oo oo Uu uu

Maxaad soo baratay?

awr bisad kalluun

masar maqal aqal webi

dameer kurdad huuri

xafiis sheeko biibiile

baaskiil

mundul

Ma fahamtay?

Xaggee baan dhigaa?


Ardaydu waa ay heesayaan.

Rooti baan rabaa.

Axmed wuu qorayaa.

Wiilka jiifaa wuu bukaa.

Maxaa aan qoray?



Ku sawir xariiq u dhexaysa erayada iyo sawirka. Sawirro ayaa ka soo hari doona.




waran

nacnac

calan

jalaato





*Sahra waxa ay samayn kartaa
waxyaabo badan.
Waxa ay quudinaysaa digaagga.
Waxa ay u daadinaysaa galley.*



*Cali waxa uu hayaa digaagad.
Waxa uu hayaa digaagad yar.
Cali, iska dhaaf, iska dhaaf.*

Eraygee baa maqan? Doorro oo qor.

hayaa

yar

dhaaf

Waxa

galley

_____ ay quudinaysaa digaagga.
Cali waxa uu _____ digaagad.
Waxa ay u daadinaysaa _____
Waxa uu hayaa digaagad _____
Cali, iska, _____ iska dhaaf.

Raadi magacyada maalmaha.
Ku dul qor xariijimaha.

1.	b	l	s	n	i	i	n	T
2.	A	s	J	i	m	c	e	R
3.	T	a	l	a	a	d	a	M
4.	c	o	S	a	b	t	i	m
5.	A	r	b	a	c	a	N	e
6.	F	r	U	l	A	x	a	d
7.	w	K	h	a	m	i	i	s

1. _____ 5. _____


2. _____ 6. _____

3. _____ 7. _____

4. _____

1. Tirada sawirka ku ag qor weerta saxa ah.


- Cali, iska dhaaf, iska dhaaf.
 Waxa ay quudinaysaa digaagga.
 Cali waxa uu hayaa digaagad.



2. U qor erayada sida ay isugu xigaan.

daadinaysaa u Waxa ay galley.


uu digaagad hayaa yar. Waxa



*Axmed lo' buu waraabinayaa.
Waxa uu ka keenay meel fog.
Waa uu daalan yahay.*



*Safiya waxa ay siddeaa biyo.
Aamina waxa ay la socotaa Safiya.
Waxa ay tegayaan guriga.*







*Cumar waxa uu soo ciyaarayaa
kubbadda cagta.
Kubbadda cagta ayuu jecel yahay.
Waa ciyaartooy fiican.*



*Kuwani waa waalidkii carruurta.
Hooyadu cunto ayey karinaysaa.
Aabbuhu beerta ayuu falayaa.*

Weeraha saxa ah ku ag qor sawirada.

*Safiya waxa ay siddaa biyo.
Hooyadu cunto ayey karinaysaa.
Kubbadda cagta ayuu jecel yahay.
Axmed lo' buu waraabinayaa.*



Saaxiib Doon

*Ma haysto anigu saaxiib,
aan wada ciyaarno oon,
is-gargaarsannee.
Inkastoy carruuruhu,
adduunyada ka buuxaan,
waligay ma aan arag,
mid aniga i raba oo
i yiraahda saaxiib!
Anna waan ka baqayaa,
inaan kaga horreeyee.
Kollayse waxa jira
mid sidayda oo kale,
inuu yeesho saaxiib,
raba oo u ooyee.
Ayaan aan fogayn,
inaan is-aragno baan,
Ilaahay ka rajaynaynaa.*





A abbo



Cumar



Axmed



Safiya



Aamina



Hooyo

Fiiri sawirada oo ka jawaab weydiimaha.
Hal eray baa ku filan.

- Kumaa daalan? _____
 Kumaa jecel kubbadda cagta? _____
 Kumaa falaya beerta? _____
 Tumaa sidda biyo? _____
 Tumaa la socota Safiya? _____
 Tumaa karinaysa cuntada? _____



Sahra waxa ay la ciyaaraysaa Fārxiya.
 Sahra waxa ay tiri,
 “Ma jeceli dheeshan.
 Waxaan rabaa dhuumaalaysi.
 Kaalay aan saaxiibadeen raadinee”.



Farxiya waxa ay tiri,
 "Waa kuwan Xaawa iyo Faadumo.
 Kaalay aan u yeedhnee.
 Faadumo, Xaawa, kaalaya!
 Aan ciyaarno dhuumaalaysi."



Faadumo waxa ay tiri,
 "Waxaan rabaa xarig ka bood."
 Sahra ayaa tiri,
 "Maya, taasi ma fiicna.
 Dhuumaalaysiga ayaa ka fiican."
 "Waayahay, ina keena."



Gabdhuhu waxa ay dheelayaan
dhuumaalaysi.



Sahra indhaha ayey isku
qabanaysaa.

“Ma tihiin diyaar?”

“Maya, weli ma nihin.”

Qor waxa ay dhahayaan.

Ka dooro weeraha ka hooseya
sawirada.



Waxaan rabaa xarig ka bood.

Ma jecli dheeshan.


Ma tihiin diyaar?


Faadumo, Xaawa, kaalaya!




Tirada sawirka ku ag qor weerta saxa ah.

- Farxiya waxa ay u yeedhaysaa saaxiibadaheed.*
- Sahra indhaha ayey isku qabanaysaa.*
- Gabdhuhu way ciyaarayaan.*
- Faadumo waxa ay rabtaa inay xadhigga ka booddo.*






Sahra iyo Axmed waxay tegayaan
dugsiga.
Waxay la socdaan saaxiibkood
Bashiir.
Aad uma soconayaan,
waayo, Bashiir baa naafo ah.




Macallinku wuxuu sawiray wiil iyo
gabar.
Wuxu yiri,
"Yaa qori kara magacyadooda?"
Bashiir wuxu qorayaa magacyo.
Sahra waxay akhriyaysaa
magacyo.



Waa waqtigii nasashada.
Wiilashu waxay ciyaarayaan
kubbadda cagta
Bashiir wuxuu ciyaarayaa
kubbadda cagta.
Si gaar ah ayuu u ciyaarayaa,
laakiin, si fiican buu u ciyaarayaa.

Waa immisadii?




Waa shantii.



Waa sagaalkii.



Waa kowdii.



Waa saddexdii
iyo badhkii.



Waa toddobadii
iyo badhkii.

1. Buuxi erayada. Sawirada ayaa ku caawin doona.

Sahra iyo Axmed waxay tegayaan



Waxay la socdaan saaxiibkood _____



Bashiir wuxuu qorayaa _____




2. Buuxi erayada. Erayo ayaa ka soo hari doona.

uma gaar kara naafo kubbadda
 Aad _____ soconayaan
 waayo Bashiir baa _____ ah.
 Sahra waxay akhriyaysaa _____
 Waa waqtigii _____
 fiican nasashada laakiin magacyo



Labada weerood baa ku habboon sawirkasta.
Tirooyinka weeraha ku hoos qor
sawirada.



1. Sahra waxay akhriyaysaa magacyo.



2. Si fiican buu u ciyaarayaa.

3. Bashiir wuxuu tegayaa dugsiga.

4. Bashiir wuxuu ciyaarayaa kubbadda cagta.

5. Bashiir wuxuu qorayaa magacyo.

6. Aad uma soconayaan.




3. naag naago beer beero far faro
sariir sariiro lug lugo kab kabo


4. Erayga saxa ah ku hoos qor sawirada. Labada
weerood ee saxa ah ku qor sawir kasta.

bisad kab sariir shimbir
bisado kabo sariiro shimbiro





*Axmed iyo saaxiibkii waxay
haystaan xarig.
Geedka ayey ku xireen.
Axmed wuu leexaysanayaa.
Saaxiibkii baa ku lulaya.*



*Xariggu ma adka.
Wuu kala go'ay.
Axmed wuu soo dhacay.
Saaxiibkiina wuu naxay.*



Axmed wuu xanuunsaday.
Lugta ayuu ka dhaawacmay.
Wuu dhutinayaa.
Saaxiibkii baa taageeraya.

Laba weerood baa ku habboon sawir kasta.
Qor weeraha saxa ah ee sawir kasta.




Wuu kala go'ay.
Axmed wuu leexaysanayaa.
Axmed wuu xanuunsaday.
Saaxiibkii baa ku lulaya.



Xarriggu ma adka.
Geedka ayey ku xireen.
Saaxiibkii baa taageeraya.
Axmed wuu soo dhacay.



Saaxiibkiina wuu naxay.
Saaxiibkii baa ku lulaya.
Axmed wuu dhutinayaa.
Saaxiibkii baa taageeraya.



Axmed wuxuu haystaa xarig. < Haa
Maya

Guriga ayey ku xireen. < Haa
Maya

Saaxiibkii wuu leexaysanayaa. < Haa
Maya


Xariggu ma adka. < Haa
Maya

Saaxiibkii wuu soo dhacay. < Haa
Maya

Saaxiibkiina wuu naxay. < Haa
Maya

Axmed wuu xanuunsaday. < Haa
Maya

Saaxiibkii baa taageeraya. < Haa
Maya



*Aamina wasakh bay leedahay.
 Qubeys bay rabtaa.
 Waxay rabtaa in ay galka ku
 qubeysato.
 Laakiin, biyuhu waa wasakh.*



*Aamina way sibiibixatay.
 Way naxsan tahay.
 Hadda, way qoyan tahay
 wayna wasakhaysan tahay.
 Aamina way ooyeysaa.*



*Aamina way kacday.
Waxay rabtaa in ay is nadiifiso.
Laakiin, ma kari karto.
Aamina way sii ooyday.
Waxay rabtaa in ay tegto
gurigoodii.*




*Safiya waxay u qubeysay Aamina..
Haddana, waxay maydhaysaa
dharkii Aamina.
Aamina dhakhsay nadiif u noqon
doontaa.
Aamina way faraxsan tahay.*

1. Isku dar weeraha, dabadeed ku guuri
buuggaaga layliska.

Aamina wasakh rabtaa.
Qubeys bay is nadiifiso.
Aamina way qubeysay Aamina.
Waxay rabtaa in ay bay leedahay.
Safiya waxay u naxsan tahay.

2. Buuxi erayada. Xarafka ugu horreeya
ayaa ku caawin doona.
Xariijimaha madow dhexdooda ayaad
eruy kale ka heli doontaa.





naxsan
biyuhu
waxay
lnakiin
rabtaa
dharkii



Tirada sawirka ku ag qor wæeraha saxa ah.





- Waxay rabtaa in ay is nadiifiso.
- Aamina way sibiibixatay.
- Aamina way kacday.
- Safiya waxay u qubeysay Aamina.
- Qubeys bay rabtaa.
- Aamina way ooyaysaa.
- Waxay rabtaa in ay galka ku qubeysato.
- Aamina way faraxsan tahay.



3. ri' ri'yo dugsi dugsiyo orgi orgiyo
webi webiyo xafiis xafiiso weji wejiyo

4. Erayga saxa ah ku hoos qor sawirada.

feynuus mindi shaati ri'
feynuusyo mindiyo shaatiyo ri'yo





*Safiya waxa ay ururinaysaa xaabo.
Waxay heshay xaabo badan.
Way faraxsan tahay.
Hadda, dab ayey shidi kartaa.*



*Safiya waxay u socotaa guriga.
Waxay siddeaa xaabo.
Waxay aragtaa dawaco iyo riyo.
Dawacadu waxay u ryanaysaa
riyaha.*



Safiya waxay shidaysaa dab.
 Hooyadeed galley ayey
 haadinaysaa.
 Safiya waxay u sheekaynaysaa
 hooyadeed.
 Waxay u sheegaysaa dawacadii
 iyo riyihii.

1. Buuxi erayada. Sawirada ayaa ku caawin doona.

Safiya waxa ay ururinaysaa _____ 

Hadda, _____  ayey shidi kartaa.

Safiya waxay u socotaa _____ 

Waxay aragtaa _____  iyo _____ 

Safiya waxay u sheekaynaysaa _____ 

2. Buuxi erayada. Erayo ayaa ka soo hari doona.

cryanaysaa shidaysaa sheekaynaysaa

Safiya waxa ay _____ xaabo.


Dawacadu waxay _____ riyaha.

Safiya waxay _____ dab.


Hooyadeed galley ayey _____

haadinaysaa sheegaysaa ururinaysaa



1. Dhawaaqee buu ku bilaabmaa?



2. Ma sixi kartaa erayada? Xarfaha ayaa is weydaarsan.




1. Erayga saxa ah ku hoos qor sawirada.




2. U tiree weeraha sida ay iskugu xigaan


- Safiya waxay u socotaa guriga.
- Waxay heshay xaabo badan.
- Safiya waxa ay ururinaysaa xaabo.
- Waxay aragtaa dawaco iyo riyo.




*Cali wuxu booqanayaa saaxiibkii.
Saaxiibkii waxa uu leeyahay
baaskiil.
Waa baaskiil qurux badan.
Cali waxa uu rabaa in uu fuulo
baaskiilka.*



*Cali wuxuu fuushan yahay
baaskiilka.
Saaxiibkii baa ku riixaya.
Cali uma wadi yaqaano si fiican.
Wuu ka baqayaa.*



*Cali wuu dhacay.
Lug buu ka dhaawacmay.
Baaskiilku wuxu yaallaa dhulka.
Saaxiibkii wuu naxsan yahay.*



*Cali waxa la geeyey isbitaal.
Dhakhtarku wuxu eegayaa lugta
Cali.
Dhakhtarku wuxu daweynayaa
Cali.
Cali wuu bogsan doonaa.*

1. Dooro erayga saxa ah oo qor.

baabuur
baaskiil

Saaxiibkii waxa uu leeyahay _____

qurux
dhicid

Waa baaskiil _____ badan.

lulaya
riixaya.

Saaxiibkii baa ku _____

Weji
Lug

_____ buu ka dhaawacmay.

guriga
isbitaal

Cali waxa la geeyey _____

Macallinku
Dhakhtarku

_____ wuxu eegayaa lugta Cali.

2. U qor erayada sida ay iskugu xigaan.
baqayaa. ka Wuu

_____ buu dhawacmay. Lug ka

_____ bogsan wuu doonaa. Cali

Hees Carruureed

Hooyo hobey hobeeyaa
Hobaalo wanagsanow waa
Af yare wiilkay samow waa
Bil imika dhalatayow waa
Labadaydii indhoodow waa
Sida ubax udug badanow waa
Laabtayda qaboojiyow waa
Hooyo hobey hobey hobeeyaa.



1. Ma akhriyi kartaa erayada?

booqanayaa fuushan dhacay isbitaal
 dhakhtarku baaskiil eegayaa riixaya
 daweynayaa qurux baqayaa naxsan
 fiican fuulo dhulka yaqaano bogsan

2. Buuxi xarfaha maqan. Erayada sare
ayaa ku caawin doona.

b_ _ _ _ iil i_ b _ t _ _ _ l

q_ _ _ ux b_ _ gs_ n

fi_ c_ _ _ dh_ _ _ _ y

ee_ _ _ _ aa b_ q_ y_ _ _

3. U tiree weeraha sida ay iskugu xigaan,
dabadeed ku qor buuggaaga layliska.

Cali wuxu fuushan yahay
baaskiilka.

Cali wuxu booqanayaa saaxiibkii.


Cali uma wadi yaqaano si fiican.

Saaxiibkii waxa uu leeyahay
baaskiil.


1.



il



ul



af

bisad?
bisat?



bas



mas



nin

2.

_ l

u_





a_

ba_

m_ s

_ in

3.






*Cumar wuxu rabaa in uu dhiso
mundul.*

Wuxu sidaa caws.

Hooyadiina waxay siddeaa caws.

Waxay caawinaysaa Cumar.



*Cumar wuxuu fuushan yahay
mundulka.*

Cawska ayuu saarayaa saqafka.

Wuu ku dhakhsanayaa.

Roobka ayuu ka baqayaa.



*Cumar wuxuu dhammeeyey
mundulkii.
Hadda, roobkii baa da'aya.
Ma rabo in ay biyuhu u soo galaan.
Biyaha ayuu ka moosayaa
mundulka.*

*Labada weerood oo kaliya baa ku habboon sawir
kasta. Labada weerood ee saxa ah ku qor
sawir kasta.*



*Cumar wuxu fuushan yahay
mundulka.
Cumar wuxu sidaa caws.
Cumar wuxu dhammeeyey
mundulkii.
Hooyadiina waxay caawinaysaa
Cumar.*



*Cumar cawska ayuu saarayaa.
saqafka.
Hadda, roobkii baa da'aya.
Cumar wuxu sidaa caws.
Wuu ku dhakhsanayaa.*



*Cawska ayuu saarayaa saqafka.
Hooyadiina waxay siddaa caws.
Haaa, roobku baa da'aya.
Biyaha ayuu ka moosayaa
mundulka.*



Cumar wuxu rabaa inuu dhiso mundul

Haa/Maya

Aabbuhu wuxu sidaa caws.

Haa/Maya

Cumar wuxu fuushan yahay aqalka

Haa/Maya

Wuu ku dhakhsanayaa.

Haa/Maya

Hadda roobkii baa da'aya.

Haa/Maya

Wuxu rabaa in ay biyuhu u soo galaan.

Haa/Maya



Waa subax.
Hooyadu guriga ayey hagaajinaysaa.
Way xaaqaysaa.
Dharka ayey ka ururinaysaa.
Sariirta ayey goglaysaa.



Hooyadu cunto ayey karinaysaa.
Cuntadu waxay saaran tahay
dabka.
Digsiga ayey walaaqaysaa.
Cuntadu waa diyaar.
Qoyskuna wuu sugayaa.



Qoysku wuu qadaynayaa.
 Hooyadu waxay u dhigaysaa
 qadada.
 Aabbuhu wuxuu la cuntaynayaa
 carruurta.
 Waxay cunayaan soor.
 Soortu way fiican tahay.
 Qof kasta cuntuu u baahan yahay.



Hooyadu darin ayey samaynaysaa.
 Waxay la fadhidaa islaan.
 Waa deriskeeda.
 Islaantu waxay u sheegaysaa
 sheeko.
 Hooyadu way xiisaynaysaa.

1. Buuxi erayada maqan. Sawirada ayaa ku caawin doona.



_____ ayey ku ururinaysa.



_____ ayey goglaysaa.

Hooyadu waxay la fadhidaa _____



_____ ayey walaaqaysaa.

Cuntadu waxay saaran tahay _____



2. Buuxi erayada. Erayo ayaa ka soo hari doona.

hagaajinaysaa walaaqaysaa qadaynaysaa

Hooyadu guriga ayey _____.

Hooyadu cuntada ayey _____.

Qoysku wuu _____.

Qof kasta cuntuu _____.

karinaysaa cuntaynaysaa haahan yahay

Ma geelii baa arooray.
Arooroo oon ku raagay?
Ma naaskii baa gabnoobay
Gabnoobood godal ka weyday?
Ma reerkii baa saboolay
Sabooloon subag ku siin?
Ma aabbahaa baa socdaalay
Socdaaloo socod ku raagay?
War doon baa inoo maqane
Aamina hooyo aamus.





Safiya iyo Axmed waxay caawinayaan hooyadood.
 Axmed wuu xaaqayaa, Safiyana
 waxay goglaysaa sariirta.
 Safiya waxay karinaysaa cuntada.
 Axmed wuxu walaaqayaa digsiga.
 Qof kasta cuntuu u baahan yahay.
 Hadda, cuntadii waa diyaar. Cuntadu
 way fiican tahay.

Safiya waxay caawinaysaa
 hooyadeed.

Safiya waxay xaaqaysaa guriga.

Axmed wuxu goglayaa sariirta.

Safiya waxay karinaysaa cuntada.

Cuntadu way fiican tahay.

Haa Maya

Haa Maya

Haa Maya

Haa Maya

Haa Maya


1.




naag



wiil



buug



ilmo



bisad



gabar

2.

n _ _ g,

_ _ i _ _



bu _ _ _

i _ m _

_ _ is _

ga _ a _

3.





Aabbuhu wuxu goynayaa galley.
 Wuxu ka goynayaa beerta.
 Majo ayuu ku goynayaa.
 Jawaanno ayuu ku gurayaa.
 Wuu ku daalay.



Aabbuhu wuxu rarayaa galley.
 Wuxu ku rarayaa gaari dameer.
 Wuxu caawinayaa dameerlaha.
 Waxay ku geynayaan suuqa.
 Wuu ku soo gadayaa.



Suuqa dad badan ayaa jooga.
 Aabbuhu wuxu u socdaa suuqa.
 Wuxu rabaa in uu galleyda ku
 gado suuqa.
 Qiimo fiican ayuu galleyda ku
 rabaa.

Erayada si sax ah ugu dhammaystir
 weeraha.

ku gurayaa

goynayaa galley

badan ayaa jooga

u socdaa suuqa

rarayaa gaari dameer

Aabbuhu wuxu _____

Jawaanno ayuu _____

Wuxu ku _____


Suuqa dad _____

Aabbuhu wuxu _____






- Aabbuhu wuxu goynayaa muus. < Haa
 Maya
- Wuxu ka goynayaa beerta. < Haa
 Maya
- Haan ayuu ku gurayaa. < Haa
 Maya
- Aabbuhu wuxu rarayaa galley. < Haa
 Maya
- Wuxu ku rarayaa baabuur. < Haa
 Maya
- Waxay ku geynayaan guriga. < Haa
 Maya
- Aabbuhu wuxu u socdaa suuqa. < Haa
 Maya
- Wuxu rabaa in uu galleyda ku < Haa
 gado suuqa. Maya




Maroodiga iyo Diinku waa saaxiib.
 Way isla hadlayaan.
 Diinkii wuxu yiri,
 "Maroodi, waan kaa dul boodi
 karaa."
 Maroodigii wuxu yiri,
 "Igama dul boodi kartid. Anigu
 waan
 weynahay, adiguna waad yar
 tahay."
 Diinkii wuxu yiri,
 "Haa, waan karaa. Waa inoo berri,
 Maroodi."



Diinkii wuxu yimid gurigiisa.
 Wuxu ku yiri xaaskiisa,
 "Berri waxan ka dul boodayaa
 Maroodi."
 Waxay ku tiri,
 "Ma kartid."
 Wuxu yiri,
 "Waan siraynaa."
 "Haa, waa yahay waan siraynaa,"
 ayey tiri.



Waa subax.
 Diinka iyo xaaskiisu waxay tageen
 guriga Maroodiga.
 Xaaskii Diinku way is qarisay.
 Diinku wuxu u yeeray
 Maroodiga.
 Wuxu yiri,
 "Kaalay bannaanka.
 Waxaan rabaa in aan kaa dul
 boodo hadda."



Diinkii wuxu ku yiri Maroodiga,
 "Maroodi, ma i fiirinaysaa?
 Kow, laba, saddex! Kor eeg!"
 Maroodigu kor ayuu eegay.
 Diinkiina wuu is qariyey.
 Naagtii Diinka ayaa soo baxday.
 Waxay tiri,
 "Ma i aragtaa?"
 Maroodigii dhulka ayuu fiiriyey.
 Muxuu arkay?

Erayada si sax ah ugu dhammaystir weeraha.


ayuu eegay. dul boodayaa Maroodi.”

way is qarisay.


waa saaxiib.

adiguna waad yar tahay.”

Maroodiga iyo diinku




“Anigu waan weynahay,”




“Berri waxan ka”



Xaaskii Diinku



Maroodigu kor



Haddii.....

Haddii aan u akhri lahaa
sida Foosiya oo kale

Haddii aan u weynaan lahaa
sida Axmed oo kale

Haddii aan gacmaha isku taagi lahaa
sida Xasan oo kale

Haddii aan u qori lahaa
sida Xaawa oo kale

Haddii aan u ciyaari lahaa
sida Cabdi oo kale

Haddii aan u dhuuban lahaa
sida Caasha oo kale

Haddii aan sawiri lahaa
sida Geelle oo kale

Haddii aan geesi noqon lahaa
sida Suleymaan oo kale

Haddii aan ka jawaabi lahaa
weydiimaha macallinka
sida Maryan oo kale

Laakiin haddii ay dhici lahayd,
anigu ani maan ahaadeen.



1. Ka jawaab weydiimaha.

Maroodiga iyo Diinku waa saaxiib.

Maroodigu wuu yar yahay.

Diinku wuxu leeyanay xaas.

Diinku wuxu sirayaa Maroodiga.

Xaaskii diinku way is qarisay.



Maroodigu kor ayuu eegayaa.


Naagtii diinka ayaa soo baxday.

Diinku wuu ka dul boodi karaa
Maroodiga.

Haa
Maya
Haa
Maya
Haa
Maya
Haa
Maya
Haa
Maya
Haa
Maya
Haa
Maya
Haa
Maya
Haa
Maya

2. Sawir Maroodi iyo Diin.



Jannaayo	Febraayo	Maarso 
Abril 	Maajo 	Juun
Luuliyo 	Ogosto	Sebtembar
Oktoobar	Noofembar 	Diisambar



Waxa la yidhaahdaa Caasha.
Magaceedu waa Caasha.

1. Waa maxay magacaagu? _____

2. Dhammaan magacyadu waxay ka bilaabmaan xarfo waaweyn. Qor saddex wiil iyo saddex gabdhood magacyadood.


3. Magacyada maalmuhu waxay ku bilaabmaan xarfo waaweyn. Qor magacyada saddex maalmood.

Sabti

4. Magacyada biluhu waxay ku bilaabmaan xarfo waaweyn. Qor magacyada saddex bilood.

Juun

Eraygee baa maqan? Dooro oo qor.



1. Sahra _____ akhriyaysaa.

2. Axmed _____ falayaa boorta.

3. _____ ordayaa.

4. Tani _____ Caasha.

5. _____ dheelayaan.

6. _____ u tegayaan?

7. Bisadu _____ cunaysaa jiir.

8. Cali _____ la hadlayaa.

Weeraha.


1. Waxa jira erayo badan.

Adiga waa eray.

Ma waa eray.

Dugsiga waa eray.

Qor erayo badan. _____



2. Haddii aad erayo isku darto waxa aad heli doontaa weer. Laakiin, waa in aad erayada u dhigtaa sida ay iskugu xigaan.

Tee baa weer ah?

b. Dheelayaan gabdhuhu way.

t. Gabdhuhu way dheelayaan.



Weertu waxay ka bilaabantaa xaraf weyn
Badanaaba waxay ku dhammaataa joogsi.

3. Qor weero.

gurigu Gurigu wuu weyn yahay.

gabadhu Gabadhu

hooyadu _____

bisadu _____

dugsigu _____

faraxsan

nadiif

wasakh

qurux

biyo

diyaar

1. Buuxi xarfaha maqan.

q__ru__, b__y__, w__a__h,

n__d__f, d__a__r, f__r__x__n

2. Buuxi erayada maqan.

Aamina _____ bay leedahay.

Waa baaskiil _____ badan.



Safiya way _____ tahay.

Ma tihiin _____?

Safiya waxa ay siddeeda _____.

Aamina _____ bay noqon doontaa.


1. Qor erayada sawirada.



2. Soo qaad xarafka ugu horeeya eray walba oo ka samee eray cusub.
Erayga cusub ku dul qor xariiqda.

3. Sawir musawirka erayga cusub, ku dhex sawir jibaaranaha.

1. Magacyada bilaha ku hoos qor sawirada.




2. Erayada qaarkood waa in lagu qoraa xarfo waaweyn. Weeraha si sax ah ugu qor buuggaaga layliska.

- b. Magacaygu waa siraad.
t. Berri waa isniin.
j. Imika waa abriil.
x. waan qorayaa.

3. Dhammaystir weeraha.

- b. Waxan haystaa _____
t. Cali wuxu arkaa _____
j. Ubaxu _____



Digaagaa yar baa heshay xabbad haruur ah.

Waxay tiri,

“Waxaan helay xabbad haruur ah. Yaa raba in uu falo haruurka?”


Jiirkii wuxuu yiri, “Anigu ma rabo.”

Bisadii waxay tiri, “Anigu ma rabo.”

Ridiina waxay tiri, “Anigu ma rabo.”

Digaagaddii yarayd baa tiri, “Aniga ayaa raba.”

Markaa, waxay fashay haruurkii.



Haruurkii wuu biqlay.

Digaagaddii yarayd waxay tiri, “Yaa raba in uu keeno biyo?”


Jiirkii wuxuu yiri, “Anigu ma rabo.”

Bisadii waxay tiri, “Anigu ma rabo.”


Ridiina waxay tiri, “Anigu ma rabo.”

Digaagaddii yarayd baa tiri, “Aniga ayaa raba.”

Markaa, waxay keentay biyihii.



Haruurkii bay waraabisay.
 Dabadeed, haruurkii baa
 dhalay.
 Digaagaddii yarayd waxay tiri,
 "Yaa raba in uu gooyo
 haruurka?
 Imika waa xilligii goynta."
 Jiirkii wuxuu yiri, "Anigu ma
 rabo."
 Bisadii waxay tiri, "Anigu ma
 rabo."
 Ridiina waxay tiri, "Anigu ma
 rabo."
 Digaagaddii yarayd baa tiri,
 "Aniga ayaa raba."
 Markaas, waxay goysay mirihii
 haruurka.



Waxay haddana weydiisay,
 "Yaa raba in uu haruurka shi-
 ido oo ka samaynaya bur?
 Jiirkii wuxuu yiri, "Anigu ma
 rabo."
 Bisadii waxay tiri, "Anigu ma
 rabo."
 Ridiina waxay tiri, "Anigu ma
 rabo."
 Digaagaddii yarayd baa tiri,
 "Aniga ayaa raba."
 Markaas, haruurkii ayey shiid-
 day oo ay ka samaysay bur.



Waxay haddana weydiisay jirkii,
bisadii iyo ridii in ay burka ka
sameeyaan canjeero ama rooti,
laakiin ma rabno ayey saddexduba
ku jawaabeen.

Digaagaddii yarayd baa tiri.

“Aniga ayaa raba.”

Markaa, burkii ayey ka samaysay
rooti.

Waxana ay weydiisay,

“Yaa raba in uu cuno rootidan
fiican?”

Jiirkii wuxuu yiri, “Aniga ayaa
raba.”

Bisadii waxay tiri, “Aniga ayaa
raba.”

Ridiina waxay tiri, “Aniga ayaa
raba.”

Digaagaddii yarayd baa qaylisay
oo tiri,

“Maya, maya, maya, cunimaysaan,
aniga ayaa tabcaday oo cunaya.”

Markaa, digaagaddii yarayd
sidaas ayey ku cuntay rootidii
fiicnayd.

Qorayaasha Buugga

1. *Xasan Cali Cusmaan*
2. *Maxamed Geelle Diiriye*
3. *Suleymaan Xuseen Barkhadle*
4. *Cabdiraxmaan Cusmaan Maxamed*
5. *Maryan Maxamuud Janaqow*

Sawirayaal

1. *Cabdirashiid Maxamed Soomow*
2. *Maxamed Cali Sh. Saciid*
3. *Cabdijibaar Cali Sheekh Maki*
4. *Cabdulqaadir Cali Xasan*
5. *Jim Goodall*

Garaace

1. *Nuur Maxamed Nuur*

Xidhiidhiyaha Madbacadda iyo X. H. Manaahijta

1. *Ismaciil Cali Sarreeye*

La Taliyaha Qaybta Soomaaliga

1. *Gudrun Forsberg*

Waxaa kaloo mahad gaar ahaaneed leh Koondaha Farqamada oo Xafiiska UNESCO u qaabilsan tale bixinta waxbarashada Soomaaliyood iyo habeeyayaasha Buggaan daabacaadlisa labaad oo kala ah:

1.	SACIID AHMED XUSEEN (Baafjo)	LAYOUT
2.	MAXAMED CALI SH. SACIID	"
3.	CABDULLAAHI MAXAMED GACAL	"

LA TALIYAHIA:

G. RETAMAL
UNESCO EDUCATIONAL ADVISER

**THIS MATERIAL WAS RE-EDITED AND RE WRITTEN
BY THE UNESCO TEAM E.D.C.**



United Nations Educational, Scientific
and Cultural Organization



MAHADNAQ

Waxaa mahad leh Hay'adda **UNESCO-UNICEF**, oo soo
abaabushay diyaarinta iyo daabacaada labaad ee Buuggaan, iyo
Hay'addaha kale sida:

AFRICAN DEVELOPMENT BANK
ADRA SOMALIA
AMURT
CARE (KENYA)
CARITAS ITALIANA
CISP
CONCERN
DIAKONIE CARITAS
HISAN
INTERNATIONAL AID (SWEDEN)
IRRES
ITALIAN ARMED FORCES
KAMAR JASIRA
NORWEGIAN CHURCH AID
RADDA BARNEN (YEMEN)
TROCAIRE
UNHCR (HARGEISA)
WATER FOR LIFE
UNESCO NATIONAL COMMISSION GERMANY
iyo
WEP

oo gacan weyn ka geystay soo saaridda Buuggaan.

Maarso 1994

AF SOOMAALI

